

## **Heer Lr.10**

Aniga oo tixraacaya Qodobka 68aad farqadiisa 1aad,2aad,3aad ee Axdira Federaalka KMG ah waxaan halkaan kuugu soo gudbinaynaa dhismaha iyo waajibaadka Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda (Civil Service Commission)

### **Qaab dhismeedka Guddiga.**

1. Guddiga waxa uu ka koobanyanya 14-Xubnood
  2. Xubnaha Guddiga waxaa lagu magacaabayaa degreeto madaxweyne kadib marka uu helo ogolaansho Golaha Wasiiradda uuna ansixiyo Golaha Baarlamaanka , waxaana soo jeedinayo wasiirka wasaarada shaqada iyo hormarinta shaqaalaha
  3. Xubnaha Guddiga marka la magacaabo waxa ay iska dhex dooran doon doona
- **Guddoomiye**
  - **K/Xigeen**
  - **Xogheye**
4. Guddigaani wuxuu jiraya mudada KMG ee Dowladda Federaalka KMG ah

### **Shuruudaha laga rabo Xubnaha Guddiga.**

1. Waa inuu heystaa /heysataa shahaado jaamacadeed ama wax u dhigma.
2. Waa inuu lahaadaa/lahaataa waaya- aragnimo shaqo ugu yaraan 5 (shan) sano.
3. Waa in uu heysan/aysan ka mid aheyn Kisbi siyaasi ah, islamaraasna uu kamid noqon Karin.
4. Waa in uusan u tartami Karin jago siyaasadeed.
5. Waa in uusan maxkamad horey ugu xukumin xukun kama danbeys ah.

### **Dhaar**

Guddiga wuxuu marayaa Dhaartan,inta uusan gudagalin hawshiisa ,( waxaa igu walaahi ah, igu bilaahi ah in aan u hogansamayo Axdira iyo sharuucda Dalka in aan hergelinayo mabaadii'da guud ee dowladda ,anigoo muujinaya dadaal,xilkasnimo, Eex-la'aan. Dhawrayana sirta Dawladda waxaana ku dadaali doonaa inaan dhowro nabadgalyada iyo sharafta iyo jiritaanka qaranka).

## **Xuquuqda Xubnaha Guddiga.**

1. Xuquuqda Xubnaha Guddiga waxaa lagu qeexi donnaa sharci gaar ah

### **Waajibaadka Guddiga**

1. Guddiga waa guddi madaxbanaan shaqadiisa iyo maamulkiisa ah.
2. Guddiga fadhigiisa 1aad waxa uu smaeysan donna xeer hoosaad.
3. Guddiga waxa uu qorayaa shaqaalaha rayidka dowladda federaalka iyo Maamul gobaleedka.
4. Dalacsiinta Shaqaalaha Dowladda joogtada ah iyo kuwa ku meelgaarka ah
5. Anshax marinta shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda federaalka iyo maamul goboleedka.
6. Shaqo ka fariisinta shaqaalaha dowladda federaalka iyo maamul goboleedada.
7. Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Rayidka ah isaga oo raacaya sharciga uyaal.
8. Diiwaangelinta iyo dukumintiyada shaqaalaha rayidka ee dowladda.
9. Sababaha aan kor ku soo sheegnay daraatood xubinta waxaa xilka looga qaadi karaanidaamkii horay loogu qaatay oo aysan ku jirin tan baarlamaanka.
10. Dajinta imtixaanaadka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda .

### **Qodobka lagu waayi karo Xubinnimada Guddiga.**

1. Dhimasho ku timaado xubinta guddiga ah.
2. Caafimaad daro joogto ah oo ay soo xaqijiyeen guddi dhaqaatiir dawladeed ah.
3. Iscasilaad qoraal ah.
4. Musuq-maasuq, laaluush,iyo xaqiraad la soo xaqijiyeey.
5. Xil gudasho la'aan oo uu ka maqnaado cudur la'aan fadhiyada Guddiga 5 (Shan) fadhi oo isku xiga.
6. Ansahax xumo oo ay soo xaqijiyeen Guddi gaar ah oo loo saaray.
7. Danbi ciqaabeed oo ay gooysay maxkamad kama danbeys ah.
8. Sababaha aan kor ku soo sheegnay dartood xubinta waxaa xilka looga qaadi karaa nidaamkii horay loogu qaatay oo aysan ku jirin tan baarlamaanka.

### **Xiriirka Wasaaradda iyo Guddiga.**

1. Wasaaradda iyo guddiga waxaa ka dhexeeya wadashaqeyn joogto ah.
2. Wasaaradda waxay soo jeedinaysaa isla markaasna hubinaysaa in xubnaha guddiga ay buuxiyeen shuruudihii laga doonayey
3. Wasaaradda shaqada iyo hormarinta shaqaalaha waxa ay u xilsaaran tahay qalabeynta iyo quburadda muhiimka ah hawlahaa guddiga.
4. Wasaaradda waxa ay kormeeri doontaa waajibaadka guud ee hawlahaa guddiga.
5. Wasaaradda waxa ay u xilsaarantahay fududeynta iyo wixii tasiilaad ah oo guddigu ugu baahdo dowladda.